

Garabsiin iyo wadajir intii xabsiga dib-u-celinta lagu schubi lahaay.

**Banaanbax maalinta sabtida ee 20. 01.2018 saacaddu marka ey tahay 15:00
saac , barxadda Luisenka Darmstadt.**

Qax ma ahan dhagar ama dambi. Bannaanbax, gobalka oo dhan ah, ayaan rabnaa in aan uga hortagno ficolka joogtada ah iyo tarxiilka caadada u noqday dowladda gobalka Hessen, dadka megengelyadoonka ah kuwa xun iyo kuwa fiican ugu qeybineyso, xabsigana u gelineyso, ayada oo u kala sooceysa sida ey ugu kala faa 'iida badanyihiin, kii aan la rabinna dambi looga dhigayo megengalyadiisa.

Dhammaadkii 2017 waxey dowladda gobalka Hessen go' aansatay in ey xabsiga Darmstadt, ee Eberstadt ku yaal, u bedesho xarunta dhexe ee tarxiilka ee Hessen oo dadka la tarxiilayo lagu sii xiro. Illaa 50 qof ayaa la rabaa in ey halkaas ku xirnaadaan -ayaga oo aan wax dambi ah gelin- kuna sie xabisnaadaan illaa inta looga tarxiilayo wadama kale sida Afghanistan iyo Pakistan.

Dowladda gobalkan Hessen waxey isku deyeysaa in ey dhaawacan ey u geysaneyso xuquuqda aas aasiga ah aadanaha qariso. Sidan ayeyna xabsiga tarxiilka ugu tilmaantay "nolol caadi ah oo laga reebay xornimo" waxeyna ku doodeysaa in bulshadu sidaan oo kaliya ku aqbali karto in ey megengelyo ku bixiso.

Doodaan ayaa ah mid aad u xanuun badan oo xabsiga looga dhigayo mid dadka ah megengelyadoonka faa'iido ugu jirto. Wuxaana halkan ka cad in waqtii hore ururrada xagjirka ah dananahoodu barnaamijka ururrada siyaasadda iyo dowladdaba saldhig u noqdeen. Adkeynta siyaasadda megengelyadoonka iyo qaxootiga iyo sameynta xabsiyo tarxiil waxey ka mid yihiin raaligelinta garabka midig iyo naceybkooda ku jiheysan megengelyadoonka.

Waa in ey dhammaataa taasi! Ma ogolaaneyno in annaga leyska kaanya horkeeno! Megengelyadoonka is abaabula, taakuleeyayaasha maalin kasta wadajirka u taagan oo markasta abaabulka kooxaha ka howlgala, kuwa uga dooda baarlamaanada in xuquuqda megengelyadoonku hayaagto iyo kuwa kale ee badan, ee aan baarlamaan ku jirin ee u dooda xornimada dhaqdhaqaqa ee aduunka oo dhan iyo nolol fiican iyo cid kasta oo rabta in ey u dagaalanto: noo kaalaya maalinta 20. Janaayo 2018 annaga oo calanka ku qoraneyna "Community for all" – Garabsiin iyo wadajir intii xabsi la gelinlahaay- aan wadajir ugu bannaanbaxno.

Ku imaada tira badan! Dhawaaqana faafiya!

somali